

## Caafimaadka Bulshada

### Aqalka Waaxda Bulshada

555 Towner St.

Ypsilanti, MI 48198

Telefoon: (734) 544-6700

Fakiska: (734) 544-6705

Email: l-wcphcontact@ewashtenaw.org

<http://publichealth.ewashtenaw.org>



## Caafimaadka Agagaarka

### Barta Adeegyada ee Western

705 N. Zeeb Rd.

Ann Arbor, MI 48103

Telefoon: (734) 222-3800

Fakis: (734) 222-3930

Email: zeebcss@ewashtenaw.org

<http://environmentalhealth.ewashtenaw.org>



Juun 2015



# Barnaamijyada & Adeegyada



Washtenaw County Public Health

Lagaa Caawinayo Ladnaantaada.

## Barnaamijka Caafimaadka Agagaarka iyo Adeegyada

(734) 222-3800

<http://environmentalhealth.ewashtenaw.org>

### Farshaxanka Jirka

Baar goobaha lagu sameeyo farshixanka jirka (sida taatuuga, dhego durista, shabada iyo waxyaabaha kaloo jidhka lagu sharaxo) si aad naftaada u dhowrato. Nasoo wac si aad noola socodsiiso goobo sharci la'aan ama nadaafad xumo kushaqeynaya.

### Kaamamka

Baar kaamamka kumeel gaarka ah iyo kuwa rasmiga ah si aad u habsato ineyna halis aheyn oo nadiif yihiin.

### Baarista Goobaha Xanaanada Caruurta

U baar goobahan sida ay rabto Waaxda Caafimaadka Adeegga Bulshada Michigan si aad u habsato agagaar ammaan ah iyo biyo mareen ammaan ah ama boosaneer.

### Tacliinta Agagaarkaaga

Qabo tacliin isweydaarsi ku aadan kamikoolka radon, ammaanka cuntada, warshadeynta, tayada biyaha iyo in kale, abaabul arimaha agagaarkaaga barnaamijka raadiyowga bulshada ee 89.1 FM-WEMU.

### Adeegga Nadaafada Cuntada

Baar goobaha adeegga cuntada 180'kii beri. Baar warbixinnada xanuunada cuntada laga qaaday. Ka jawaab cabashooyinka, baar kahor inta meel cunto iibin rabta aan la furin. Soo sheeg warbixintii ku saabsan xanuun cunto lagu xanuunsaday.



Sarkaal nadaafadeed oo baaraya amaanka nadaafada maqaayad agagaarka ka dhaw.

### Ilaalinta Biyaha Dhulka

La shirkow dowlada hoose iyo muwaadiniinta si aad u abuurtaan sharciyo iyo kaartooyin looga hadlayo 1,4-dioxane iyo summowga biyaha dhulka mara.

### Cabashooyinka Guriyeynta

Baar cabashooyinka oo xal u raadi agagaarka guriyeynta aan nadiifka aheyn. Soo wactan si aad uga warbixiso xaaladahan.

### Biyogaleen Goobta Ka Dhaw

Samee ciid qiimeyn si aad ku ogaato qaabka loo daweyn lahaa biyo galeenka iyo noocu yahay; bixi shatiyo boosaneer, tababar iyo sharciyeynta adeeg bixiyayaasha kala duwan ee howshan ku jira ama u tababaran.

### Goob Biyaha Qeybisa

Bixi sharciyo ceel, kor kala soco oo baar nooca biyo ee la qeybinayo una yeel sharciyo ammaan oo la raaco.

### Ka hortaga Qiiqa Wax Sumeeya

Baar warshadaha keydsha, soo saara, ama isticmaala waxyaabaha suntan ah ee qiic sumeeda dhaliya, oo hubi in waxyaabahan sharciyadeeda la raaco si haboona loo daadsho.

### Barnaamijka Radon

Sii bulshad qalabka lagu baaro sunta radonka si ay gurigooda ugu baraan. Wac ama imow xafiiska si aad u iibsato qalabka lagu baaro sunta radonka.

### Biyaha Berkadaha

Baar dhamaan berkadaha lagu qubeysto ee bulshada sanad walba. Labadii isbuuca qeyb ka soo qaad. Baar oo ka war hay meelaha kale lagu qubeysto xiliyada kuleylaha.

### Baarista Xiliga Iibka

Qiime warbixinnada baarista si aad u habsato dhismayaasha lakala iibsanayo iney leeyihiin sistam biyo iyo boosaneer shaqeynaya oo wa iney baraan dad tababaran oo sharci u heysta.

### Adeegyada Baarista Biyaha

Bixi caagaga lagu baaro biyaha si loogu baaro ceelalka ay sida khaaska ah u leeyihiin bulshada qaar si bakteeriya looga, arsenic iyo sun kale. Xafiiskeena ka soo qaado caaga biyaha lagu baaro.

## Barnaamijyada iyo Adeegyada Caafimaadka Bulshada (734) 544-6700

Wixii warbixin dheraad ah. Ka Wac telefoon keenna guud ama booqo: <http://publichealth.ewashtenaw.org>



### Cafimaadka Doobka, Baarista HIV/STD (734) 544-6840

Cuduradda galmada ku yimaada (STD) baaristooda iyo dhayiddooda, waanno iyo baaris HIV bilaash ah, baaris HIV fudud ama sir ah, PrEP (Qorshaha looga hortago cudurada aan u nugushahay), qaab looga hortago cudurada oo u furan dadka halista ugu jira inuu ku dhaco HIV, adeegyo bilaash ah oo xog kaa siinaya arimahan, baarista inaad uur leedahay, iyo talooyinka kiniiniyada dhalmo yareynta. Soo wac ama imow Khamiisaha 1 ilaa 4pm. Uur iska baaris bilaash ah Arbacooyinka.

### Qaniinyada Bahallada iyo Raabiyada

Soo sheeg hadii bahal ku qaniino ama kibili. Waxaan kaala talin karnaa hadaad u baahan tahay tallaalka raabiyada kadib markuu bahal ama wax kale ku qaniinaan. Waxaan kaloo qorsheynaa baarista raabiyada qaniinyo bahal kadib.

### Adeegyada Caafimaadka ee Caruurta Tayada Gaaban


Isku duwaha iyo maamulaha kaysaska caruurta iyo doobabka qaba caafimaaddaro dayo-dari ah oo laga caawin karo. Barnaamijku wuxuu kaloo ka caawin karaa hubsashada caafimaad-darada gaarka ah.

### Cuduradda Fidda

Warbixin, waxbarasho, baaris iyo baafinta cudurada infekshinka leh. Adeegyada Tiibishada (TB) oo ay ka mid yihiin baarista iyo dhayidda tiibishada nool. Iska baarista Tiibishada (TB) ee duubka/jirka waxaa lagu qadaa inaad balan sameysato.

### Isbitaalka Ilkaha (877) 313-6232 ama (734) 480-4250

Isbitaalka Ilkaha ee Degmada Washtenaw wuxuu u adeegaa doobka iyo caruurta haysta Medicaid, MICHild ama Healthy Kids, ama kuwaan caymis laheyn ee saboolka ah. Ku yaala Aqalka St Joseph Mercy Haab Health Building, 111 N. Huron Street, Ypsilanti. Soo Wac hadii aad balan ka rabto.



### Horumarinta Caafimaadka

Hindisiyo ka shaqeyna siduu loo taageeri lahaa halista cuno caafimaad leh, meel nabdoon oo lagu jimjimicsado oo looga shaqeyno kahortaga isticmaalka tubaakada, isdaldalka, iyo maandooriyaha. Barnaamijyo ay ku jiraan Prescription for Health, Washtenaw Alive iyo dhaqangelinta Clean Indoor Air Regulation. Caawinaado Tegnoolaji oo la xariira dhexgalka kumyunitiga, qanuunada iyo isbedelada agagaarka lagu taageerayo caafimaadka loogana hortagayo cudurada ayaa jira.

### Maqal iyo Muqaal (734) 544-6786

Baaritaan maqal iyo muuqaal bilaash ah ee shaqsiyaadka ka yar 21 iyo ardayda tayadooda tacliineed liidato ee ilaa iyo 26 jirka ah. Baaritaanada badankood waxaa lagu qabtaa iskuulada, iskuulada bareekeyyada iyo goobaha xanaanada caruurta. Balan xafiiska laga sameysto ayaa iyana furan.

### Tallaalada

Tallaaladu waxay kahor tagaan cudurada. Kalkaalisooyinku waxay bixin tacliin, maamuli tallaalada, oo la shaqeyn iskuulada iyo bixiyayaasha iyo saxiibada kumyunitiga. Si tallaalka loo taageero. Kalkaalisooyinku waxay kaloo u fidiyaan walidiinta raba iney ka daayaan tallaalka caruurtooda tacliin cilmiga sayniska ku dhisan. Naga soo wac qiimaha, helitaanka tallaalka, iyo balamaha.

### Barnaamij Dhiig-Qaadis

Kalkaalisooyinka caafimaadka bulshada waxay fidiyaan la socosho, tacliin, iyo tallo bixin markii ay cadaato in cunuga dhiigiisa lead'ka loogu yeero ka sareeyo inta loogu talagalay. Dhiig-qaadita lead'ka loo yaqaan waxay u furan tahay qofkii dalbada. Guriga oo ay kugu soo booqdaan dad khibrad u leh xataa way kuu furan tahay markii loo baahdo.

### Barnaamijka Caafimaadka Hooyada iyo Dhalaanka

Barnaamijyo guriga lagu booqanayo dumarka uurka leh iyo dhalaanka oo ka tirsan caymiska Medicaid. Adeegyada waxaa ka mida tacliin, adeeg isuduwidada, caawin ay fidinayaan kays maamulle, kalkaaliso iyo dhaqtarka nafaqada.

### Baarista Meydka (734) 232-1127

Ku taala qeybta meydka ee Jaamacadda Michigan, Baaraha Meydku wuxuu baraa dhimasho si kadis ah oo arxan darro iyo ula kac ah uga dhacday Degmada Washtenaw. Warbixin meyd ayaa xafiiskooda laga codsan karaa. Qiimuhu waa \$25.

### Iskaashyio, Xogta, Xeeladdo

Qorshaha Hormarinta Caaafimaadka ama (HIP) waa dadaal qorshe iyo qiimeyn caafimaad ah oo kormyunitigu ku mideysan yahay. Ujeedadu waa in la hormariyo caafimaadka dadka degmada idil. HIP waxay aruurisaa xogta, oo ay ka mid tahay sahan qaado shanti sano. Iskaashadayaashu waxay isticmaalaan xog ay ku dhisaan, dhaqan gelshaan oo ku qiimeyaan qorshaha hagaajinta caafimaadka bulshada.

### U Diyaar ahaanshaha Xaaladaha Deg Dega ah ee Caafimaadka Bulshada

Tababarka iyo warbixinta u diyaar ahaanshaha ay ku jiraan fasallo iyo talooyin ku aadan qoysaska, shaqsiyaadka iyo ururada bulshada ayaa banaan. Dadka raba iney caawiyaan am ka qeyb noqdaan gargaarka xaaladaha deg dega ah, ha iska soo qoraan Washtenaw County Medical Reserve Corps. Soo wac wacaa ama booqdaan bogeenna intarneetka.

### Qorshayaasha Caafimaad ee Washtenaw (734) 544-3030

Caymis caafimaad ma leedahay? Qorsha Caymiska Caafimaad ee Washtenaw wuxuu shaqsiyaadka ka caawiyaa iney caymis caafimaad helaan. Shaqaalaha WHP waxay kaa caawin karaan Medicaid, Healthy Michigan Plan, Healthy Kids, MICHild, the Marketplace iyo Washtenaw Health Plan. Wac ama Booqo, Isniinta ilaa Jimcaha ka bilow 9am ilaa 4pm.

### Fayraska West Nile (WNV)

(734) 544-6750  
Qadka warbixintu wuu furan yahay markii loo baahdo in laysaga jawaabo su'aalo ku saabsan fayraska WNV ama wax kale oo caafimaadka halis ku ah. Marki la daaro, dadka soo waca waxay soo sheegi karaan shihiro dhintay oo dhegeysan karaan warbixin duuban.

### Dumarka, Sebiga, iyo caruurta (WIC) (734) 544-6800

Barnaamijka Dumarka, sebiga, iyo caruurta (WIC) wuxuu bixiyaa cunto iyo nafaqo caafimaad oo ay siyaan dumarka uurka leh iyo caruurta ilaa shan jir. WIC waxay kaloo tababartaa la taliyayaal hoyooyinka kala talsha naasnuujinta. Soo wac hadaad balan rabto, goobaha isbitaalada iyo warbixinno kale.



## Barnaamijyo iyo Adeegyada ay bixiyaan hay'daha aan Iskaashanno.

### Adeegyada Bulshada ee Cudurka Dhimirka iyo Maandooyiraha (800) 440-7548 or (734) 544-3050

Washtenaw County Community Support iyo Treatment Services (CSTS) waxay bixiyaan adeegyadaas. Fadlan wac Health Services Access si aad cawinaad u hesho.

### Barta Aruurinta Sunta Gurayaha (734) 222-3950

<http://recycle.ewashtenaw.org>  
Xafiiska biraha ee Water Resources Commissioner wuxuu bulshada u fidiyaa meel ay ku turaan alaabaha sunta leh ama dhacay oo ay ku jiraan sunta murkeriga, rinjiga iyo kamikaal kale. Wac ama ka booqo websayta wixii warbixin ah.

### Celinta Cirbadaha iyo Dawooyinka. [www.dontflushdrugs.com](http://www.dontflushdrugs.com)

Xafiiska biyaha ee Water Resources Commissioner waxay kala shaqeysaa farmashiyada iney ceshtaan cirbadaha iyo dawooyinka dhacay ee aan la isticmaalin, kuna ridaan meel ku haboon. Booqo websaytka si aad u ogaato goobaha ka qeyb qaadanaya.